# رمضان شهر الإيمان وصناعة الرجال

## Ramadaan waa bisha iimaanka iyo dhisidda ragga

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(مِنَ الْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا مَا عَاهَدُوا اللَّهَ عَلَيْهِ فَمِنْهُم مَّن قَضَى نَحْبَهُ وَمِنْهُم مَّن يَنتَظِرُ وَمَا بَدَّلُوا تَبْدِيلًا)

(**Mu'miniinta waxaa ka mid ah rag ka rumeeyay waxay Alle kula ballantameen, waxaana ka mid ah mid gutay ballankii (ajashiisii) waxaana ka mid ah mid sugaya mana ayna badalin**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Rummeynta Ilaahay – *cazza wajalla* – waxay ka mid tahay nimcooyinka ugu waaweyn ee addoonka Alle siiyay, Alle wuxuu leeyahay:

(...وَلَكِنَّ اللَّهَ حَبَّبَ إِلَيْكُمُ الْإِيمَانَ وَزَيَّنَهُ فِي قُلُوبِكُمْ وَكَرَّهَ إِلَيْكُمُ الْكُفْرَ وَالْفُسُوقَ وَالْعِصْيَانَ أُولَئِكَ هُمُ الرَّاشِدُونَ * فَضْلًا مِنَ اللَّهِ وَنِعْمَةً وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ)

(**Wuxuuse Alle idin jecleysiiyay limaanka, kuna qurxiyay quluubtiinna, wuxuuna idin nacsiiyay gaalnimada, iyo faasiqnimada iyo caasinnimada, kuwaasina waa kuwa hanuunsan**), waxaan shaki ku jirin in bisha Ramadaan ee barakaysan ay tahay bisha imaanka dhabta ah, sidaa awgeed aayadaha soonka ee Quraanka kariimka waxay ku bilowdeen ku dhawaaqidda sifada iimaanka, Alle – subxaanahu - wuxuu yiri:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ)

(**Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan**),

Imaanka dhabtana waa in la rummeeyo wax kaste xagga Alle – *subaxaanu* - ka yimid, laguna camalfalo, waxaa kusoo arooray xadiiska Jibriil – *nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – ee caanka ah caddeynta dhabta iimaanka, kaasoo ay habboon tahay inuu ku jiro qalbiga mu'minka, wuxuu yiri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(أَنْ تُـؤْمِنَ بِـاللَّهِ ، وَمَلَائِكَتِـهِ ، وَكُتُبِـهِ ، وَرُسُـلِهِ ، وَالْيَـوْمِ الْآخِـرِ، وَتُـؤْمِنَ بِالْقَـدَرِ خَيْـرِهِ وَشَرِّهِ)

(**Inaad rummeyso Ilaahay iyo malaa'igtiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo maalinta aakhiro iyo inaad rummeyso qadarka khayrkiisa iyo shartiisa**).

Iimaanka ma aha oraah afka laga sheego kaliya, laakinse iimaanka waa wax qalbiga ku dego oo camalka rummeeyo, Alle – *subxaanahu* – wuxuu leeyahay:

(إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ *الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ * أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا)

**(Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Alle la xuso ay cabsato quluubtoodu, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Allena ay Iimaan u kordhiso, Allahoodana uun talasaarta * ee ah kuwa ooga salaadda waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya * kuwaas waa mu'miniinta dhabta ah).** Rasuulka – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haatee* – wuxuu leeyahay:

(الْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ الْمُسْلِمُونَ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ، وَالْمُؤْمِنُ مَنْ أَمِنَهُ النَّاسُ عَلَى أَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ)

**(Muslinka waa midka ay ka nabadgaleen muslimiinta carrabkiisa iyo gacantiisa, mu'minkana waa midka ay dadka kaga badbaadeen hantidooda iyo naftooda).**

Qofka dhaqankiisa kaga leexday amarka Alle iyo wixii uu reebay wuxuu ka leexday waddada iimaanka, wuxuu arrinkaas ka yiri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

( لَا يَزْنِي الزَّانِي حِينَ يَزْنِي وَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَلَا يَشْرَبُ الْخَمْرَ حِينَ يَشْرَبُ وَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَلَا يَسْرِقُ حِينَ يَسْرِقُ وَهُوَ مُؤْمِنٌ)

**(Ma dhillaysto dhillayga markuu dhillaysanayo isagoo mu'min ah, khamro ma cabbo markuu cabbayo**

**isagoo mu'min ah, wax ma xado markuu wax xadayo isagoo mu'min ah).**

Wuxuu caddeeyay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – inuusan lahayn iimaan dhammaystiran qofka deriskiisa dhibaya, ama qofka bariya isagoo dhergan deriskiisana gaajaysan isaguna og yahay, maxaayeelay iimaanka waxaa laga maarmaan ah inuu camal la socdo, wuxuu yiri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(وَاللَّهِ لاَ يُؤْمِنُ، وَاللَّهِ لاَ يُؤْمِنُ ، وَاللَّهِ لاَ يُؤْمِنُ ، قِيلَ : وَمَنْ يَا رَسُولَ اللهِ؟ قَالَ: الَّذِي لاَ يَأْمَنُ جَارُهُ بَوَائِقَهُ)**

(**Wallaahi ma rummeynayo, wallaahi ma rummeynayo, wallaahi ma rummeynayo, waxaa lagu yiri: rasuulkii allow waa kuma? Wuxuu yiri: midka aan deriskiisa shartiisa ka badbaadin**), wuxuu leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(مَا آمَنَ بِي مَنْ بَاتَ شَبْعَان وَجَارُهُ جَائِعٌ إِلَى جَنْبِهِ وَهُوَ يَعْلَمُ)**

(**Ima rummeynin qofkii bariyo isagoo dhergan deriskiisana ku gaajeysan dhinaciisa isaguna og yahay**).

Iimaanka dhabta ah waa kan ka ilaaliya qofka inuu ku xadgudbo xaqa dadka kale, iyo inuu gardarraysto, wuxuu ka nadiifiyaa qofka laabtiisa xaasidnimada iyo cuqdada, iyo nafjecleysiga, iyo isku gaaryeelidda, iyo khiyaanada iyo dhagarta, iyo fasahaadka iyo fasahaadinta, waa midka toosiya dhaqanka qofka, raadkiisa ayaa ka muuqanaya dhaqankiisa iyo noloshiisa oo dhan, iyo siduu ula dhaqmayo khalqiga Ilaahay

dhammaantood, naxariista aadanaha iyo xayawaanka iyo manoolaha, isagoo raadinaya raalliga Alle kaligii, Ilaahay wuxuu yiri:

**(وَيُطْعِمُونَ الطَّعَامَ عَلَى حُبِّهِ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا * إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ اللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنْكُمْ جَزَاءً وَلَا شُكُورًا)**

(**Waxayna quudiyaan cuntada iyagoo jecel miskiinka iyo agoonka iyo kan xabbisan (dhibban) * iyagoo dhihi waxaan idiin quudinnaa dar Alle, mana idinka doonayno abaalmarin iyo mahadnaq midna**).

Iimaanka waa geed salkiisu sugan yahay laamihiisana cirka ay ku shareeraan, marka uu salkiisa xoogeysto, jirriddiisana ay sugnaato, miro ayuu dhalayaa waqti kaste Ilaahay idmo, soonka dhabta ah wuxuu kasoo burqanayaa iimaankan, marka nafta ayuu ku faafinayaa xasillooni iyo deganaan iyo dhowridda Alle - *cazza wa jalla* -, waxaad arkaysaa qofka si dhabta ah u sooman inuusan been sheegaynin, maxaayeelay soonka iyo beenta ma kulmaan, soonka wuxuu taagan yahay heerka ugu sarreeya cabsida Alle – *cazza wajalla* – ee qarsoon soo muujinta kahor, waa sirta ka dhexeysa addoonka iyo rabbigiisa, beentana waa astaamaha munaafuqnimada ugu waaweyn uguna sarreeya, soonakana si toos ayay uga hor imaanaysaa, sidaas awgeed isuma imaan karaan mana kulmi karaan, waa inuu sooman yahay ama waa inuu yahay beenlow, sidaas awgeed nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

**(مَنْ لَمْ يَدَعْ قَوْلَ الزُّورِ وَالعَمَلَ بِهِ فَلَيْسَ لِلَّهِ حَاجَةٌ فِي أَنْ يَدَعَ طَعَامَهُ وَشَرَابَهُ)**

**(Qofkaan iska dhaafin Hadalka beenta iyo ku dhaqankiisa Ilaahay dan kama laha inuu ka tago cuntadiisa iyo cabbitaankiisa)**,

**(وعندما سُئل رَسُولِ اللَّهِ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ جَبَانًا؟ فَقَالَ: (نَعَمْ)، فَقِيلَ لَهُ: أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ بَخِيلًا؟ فَقَالَ: (نَعَمْ)، فَقِيلَ لَهُ: (أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ كَذَّابًا) ، فَقَالَ: (لَا)).**

**(Markii nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – la weyddiiyay oo lagu yiri: mu'minka ma noqdaa fuley? Wuxuu: yiri haa, waxaa lagu yiri mu'minka ma noqdaa bakhayl? wuxuu yiri haa, waxaa lagu yiri: mu'minka beenlow ma noqdaa? Wuxuu yiri: maya)**

Iimaanka dhadhan iyo macaan ayuu leeyahay, mana dareemaan dadka raalli laga yahay mooyee, kuwaas oo qalbigooda iimaanka ka buuxsamay, wuxuu yiri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(ذَاقَ طَعْمَ الْإِيمَانِ مَنْ رَضِيَ بِاللَّهِ رَبًّا ، وَبِالْإِسْلَامِ دِينًا ، وَبِمُحَمَّدٍ (صلى الله عليه وسلم) رَسُولًا)**

**(Iimaanka ayuu dhadhamiyay qofka raalli uga noqda Ilaahay rabbi ahaan islaamkana diin ahaan, Muxamedna - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – rasuul ahaan)**, wuxuu yiri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(ثَلاثٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ وَجَدَ بِهِنَّ حَلاوَةَ الإِيمَانِ : أَنْ يَكُونَ اللهُ وَرَسُولُهُ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِمَّا سِوَاهُمَا ، وَأَنْ يُحِبّ المَرْءَ لاَ يُحِبُّهُ إلاَّ للهِ ، وَأَنْ يَكْرَهَ أَنْ يَعُودَ فِي الكُفْرِ بَعْدَ أَنْ أَنْقَذَهُ اللهُ مِنْهُ ، كَمَا يَكْرَهُ أَنْ يُقْذَفَ فِي النَّارِ)**

(**Seddex qofkay ku sugan yihiin wuxuu ku helayaa sababtooda macaanka iimaanka: inay ahaadaan Ilaahay iyo rasuulkiisa kuwa lagaga jecel badan yahay wixii iyaga kasoo haray, inuu qofka jeclaado oo uuna u jeclaanin Ilaahay dartii mooyee, iyo inuu naco u noqoshada gaalnimada markii Ilaahay kasoo badbaadiyay kaddib, siduu u nacayo in dab lagu rido**).

Iimaanka iyo dhaqanka wanaagsan waa saaxiibo, nabigeena wuxuu leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(أَكْمَلُ النَّاسِ إِيمَانًا أَحَاسِنُهُمْ أَخْلاقًا ، الْمُوَطَّئُونَ أَكْنَافًا ، الَّذِينَ يَأْلَفُونَ وَيُؤْلَفُونَ ، وَلَا خَيْرَ فِيمَنْ لَا يَأْلَفُ وَلَا يُؤْلَفُ)**

(**Dadka ugu dhammeystiran iimaan ahaan waa dadka ugu dhaqan wanaagsan, oo dabci qabow, kuwaasoo wax jeclaada iyaguna la jeclaado, khayr ma leh qofkaan wax jeclaanin isaga la jeclaanin**), iimaanka waa iftiin, cibaadadana waa iftiin, qofka dhadhamiyo macaanka iimaanka iyo raaxada cibaadada, ma suurtagalyso inuu garto mooyee jilicsanaanta iyo fudeydka iyo dhaqanka suuban, iskama weynaysiiyo khalqiga Ilaahay, wejigana uma tubo, mana ku xadgudbo, xumaanna xumaan kuma celiyo, ee wuu cafiyaa waana masaamaxaa, sidaa awgeed rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* wuxuu yiri-:

**(فَإِذَا كَانَ يَوْمُ صَوْمِ أَحَدِكُمْ، فَلَا يَرْفُثْ يَوْمَئِذٍ وَلَا يَسْخَبْ ، فَإِنْ سَابَّهُ أَحَدٌ أَوْ قَاتَلَهُ، فَلْيَقُلْ: إِنِّي امْرُؤٌ صَائِمٌ)**

(**Haddii midkiina uu sooman yahay yuuna afxumo ku dhaqaaqin maalintaas yuuna qaylinin haddii qof caayo ama la dagaallamo ha yiraahdo: waxaan ahay qof sooman**), waxaa laga rabaa qofka caqliga leh inuu ogaado inuusan jannada ku galaynin cibaadadiisa kaliya, wuxuu ku gali karaa akhlaaqdiisa iyo jilicsanaantiisa iyo wanaagga uu dadka kula dhaqmo, nabiga wuxuu leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(حُوسِبَ رَجُلٌ مِمَّنْ كَانَ قَبْلَكُمْ ، فَلَمْ يُوجَدْ لَهُ مِنَ الْخَيْرِ شَيْءٌ ، إِلَّا أَنَّهُ كَانَ يُخَالِطُ النَّاسَ ، وَكَانَ مُوسِرًا ، فَكَانَ يَأْمُرُ غِلْمَانَهُ أَنْ يَتَجَاوَزُوا عَنِ الْمُعْسِرِ، فقَالَ اللهُ (عَزَّ وَجَلَّ): (نَحْنُ أَحَقُّ بِذَلِكَ مِنْهُ، تَجَاوَزُوا عَنْهُ)**

(**Nin ayaa la xisaabiyay oo ka mid ahaa dadkii idinka horreeyay, wax khayr ah lagama helin, laakin dadka ayuu dhex gali jiray, wuxuuna ahaa nin hodan ah, wuxuu amri jiray shaqaalihiisa inay iska dhaafaan qofka dhibban, Ialaahay – *cazza wajalla* – wuxuu yiri: (Annaga ayaa kaga xaqnimo badan arrintaas, ee iska dhaafa**).

Waxaan adkeynaynaa inuu yahay iimaanka dhabta ah iftiin Ilaahay ku ridayo qalbiga addoonka, wuxuu dhaxalsiinayaa xigmad iyo yaqiin, wuxuu ka dhigayaa qof iftiinka Alle - *cazza wajalla*- wax ku arko.

Anas - *Ilaahay raalli haka noqdee* – waxaa laga wariyay in rasuulka Alle - *naxariis iyo nabadgelyo*

*korkiisa ha ahaatee* – maalin uu soo baxay, waxaa ka hor yimid wiil dhalinyar oo ka mid ahaa Ansaar oo la yiraahdo: Xaaritha bin Annocmaan, wuxuu ku yiri: **Xaarithow sidee ku bariday?** Wuxuu yiri: waxaan ku bariyay iimaan dhab ah, rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu ku yiri: **eeg waxa aad leedahay, xaq kaste xaqiiqo ayuu leeyahay xaqiiqada iimaankaaga waa maxay?**, wuxuu yiri: nafteyda adduunyo ayay ka dheeraatay, habeenkiina waan dhafriyaa dharaartiina waan oommiyaa, waaba anigoo eegaya carshiga rabbigayga oo muuqda, waaba anigoo eegaya reer jannaadka sidey isugu booqanayaan jannada dhexdeeda, waaba anigoo eegaya reer naareedka sidey isugu soo horjeedaan naarta dhexdeeda, rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – ayaa ku yiri: **waad aragtay ee laasim (labo jeer) waa addoon Ilaahay qalbigiisa iimaanka ku ifiyay**).

Imaanku waa qaybo kala duwan, waxaa ku habboon mu'min kaste inuu ku dadaalo ku dhaqankooda, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

**(الإِيمَانُ بِضْـعٌ وَسَبْعُونَ، أَوْ بِضْـعٌ وَسِتُّـونَ شُعْبَةً، فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّه، وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ ، وَالْحَيَاءُ شُعْبَةٌ مِنَ الإِيمَانِ)**

**(Iimaanka waa toddobaatan iyo dhowr ama lixdan iyo dhowr qeyb, waxaa ugu fiican oraahda laa ilaaha illallaah, waxaana ugu hooseysa in jidka qashinka laga leexiyo, xishoodkana waa qeyb iimaanka ka mid ah).**

Ninka markuu weyddiiyay Xasan Albasri - *Ilaahay ha u naxariistee* -: mu'min miyaad tahay? Wuxuu ku yiri: imaanka waa labo, haddii aad i weyddiinayso iimaanka Ilaahay iyo malaa'igtiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo jannada iyo naarta iyo soo saaridda iyo xisaabta aniga mu'min ayaan ahay, haddii aad i weyddiinayso oraahda Alle – *tabaaraka watacaalaa* -:

**(إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ *الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ * أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا)**

**(Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Alle la xuso ay cabsato quluubtoodu, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Allena ay iimaan u kordhiso, Allahoodana uun tala saarta * ee ah kuwa ooga salaadda waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya * kuwaas waa mu'miniinta dhabta ah),** Ilaahay baan ku dhaartee ma ogi inaan ka mid ahay iyo in kale.

Imaanka dhabta ah wuxuu dhaxalsiiyaa qofka amaan iyo xasillooni, iyo nolol fiican oo la'aantiisa aan la heli karin, Alle – wuxuu leeyahay:

**(مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَى وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً)**

**(Qofkii sameeya wanaag oo lab ama deddig ah isagoo mu'mina waxaan noolaynaynaa lolol wanaagsan)**

Wuxuu leeyahay – *subxaanahu* -:

**(الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُّ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللَّهِ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ)**

(**Ee ah kuwa rummeeyay xaqa kuna xasishay quluubtoodu xuska Ilaahay, xuska Ilaahay bayna ku xasishaa quluubtu**), maxaa ka fiican qofka yiri:

**إذا الإيمـــان ضـــاع فلا أمـــان *** ولا دنيـــا لمـــــن لم يحي دينـــــا**

**ومن رضي الحيـــاة بغــير دين *** فقـــد جــعـــل الفنـــاء لهـــا قرينـــا**

Hadduu iimaanka lumo amaan uma yaallo*** iyo adduunyaba qofkaan diinta nooleynin
Qofkii nolosha raalli kaga noqda diin la'aan *** wuxuu uga dhigay baabba'a mid la saaxiib ah

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haato midka lagu khatimay anbiyada Ilaahay iyo rusushiisa oo ah sayidkeena Muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantood, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Haddii bisha Ramadaan ay tahay bisha iimaanka, sidoo kale waa bisha ragga soo saarta, soonka waa dugsi baraaktis ah oo ragga dhabta ah soo muujiya, wuxuu leeyahay Axmed Showqi: "soonka waa reebitaan jideysan iyo gaajo isku abaabin, iyo Alle in loo khushuuco loona hoggaansamo, farad kaste wuxuu leeyahay xigmad, xukunkaan cadaab buu u muuqdaa laakin gudihiisa waa naxariis, wuxuu kiciyaa damqasho, sadaqadana wuu ku boorriyaa, islaweynidana wuu jabiyaa, adkeysigana wuu baraa, samafalkana wuu jideeyaa, markuu gaajoodo qofkii dhereg bartay, kan nimcaysanna laga reebo sababaha raaxada, wuxuu garanayaa faqriga siduu u dhaco, iyo xanuunkiisa siduu yahay markuu gubo.

Qofka fiirfiirinaya Qur'aanka kariimka wuxuu ogaanayaa raganimada inay tahay sifo oo Alle – *subxaanahu watacaalaa* - uuna siinin qofkii leh kartideeda mooyee, taasoo ay ka mid tahay in run laga sheego ballanta Alle lala galay – *subxaanahu* – iyadoon waxa laga baddalin ama laga leexanin Alle wuxuu yiri:

(مِنَ الْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا مَا عَاهَدُوا اللَّهَ عَلَيْهِ فَمِنْهُم مَّن قَضَى نَحْبَهُ وَمِنْهُم مَّن يَنتَظِرُ وَمَا بَدَّلُوا تَبْدِيلًا)

**(Mu'miniinta waxaa ka mid ah rag ka rumeeyay waxay Alle kula ballantameen, waxaana ka mid ah mid mid gutay ballankii (ajashiisii) waxaana ka mid ah mid**

**sugaya mana ayna badalin**), sidoo kale raga dhabta ah waa kuwa naftooda iyo hantidooda ka iibiyay Allaha caalamka rabbiga u ah, taasna waxay noqon kartaa in nafta iyo maalka loo huro diinta iyo dalka iyo sharafta iyadoo la raadinayo raalliga Ilaahay, Alle wuxuu yiri:

**(إِنَّ اللَّهَ اشْتَرَى مِنَ الْمُؤْمِنِينَ أَنْفُسَهُمْ وَأَمْوَالَهُمْ بِأَنَّ لَهُمُ الْجَنَّةَ يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَيَقْتُلُونَ وَيُقْتَلُونَ وَعْدًا عَلَيْهِ حَقًّا فِي التَّوْرَاةِ وَالْإِنْجِيلِ وَالْقُرْآنِ وَمَنْ أَوْفَى بِعَهْدِهِ مِنَ اللَّهِ فَاسْتَبْشِرُوا بِبَيْعِكُمُ الَّذِي بَايَعْتُمْ بِهِ وَذَلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ)**

**(Alle wuxuu kaga gatay mu'miniinta naftooda iyo xoolahooda inay janno u sugnaato, way u dagaallamayaan Ilaahay dartii wax bay dilaan iyaguna waa la dilaa, waana yabooh ku sugan (dhaba) Tawreed iyo Injiil iyo Quraanka, yaa ka oofin badan ballankiisa Alle ku bishaaraysta gadiddiina ood gaddeen taasina waa liibaanta wayn.).**

Ramadaan waa bisha camiridda masaajidda iyo salaatulaylka, waxayna ka mid yihiin waxyaalaha lagu dhiso shakhsiyadda iyo ragga kuwa ugu muhimsan, Alle –*subxaanahu* - wuxuu leeyahay asoo la hadlaya nabigiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(يَا أَيُّهَا الْمُزَّمِّلُ * قُمِ اللَّيْلَ إِلَّا قَلِيلًا * نِصْفَهُ أَوِ انْقُصْ مِنْهُ قَلِيلًا * أَوْ زِدْ عَلَيْهِ وَرَتِّلِ الْقُرْآنَ تَرْتِيلًا* إِنَّا سَنُلْقِي عَلَيْكَ قَوْلًا ثَقِيلًا * إِنَّ نَاشِئَةَ اللَّيْلِ هِيَ أَشَدُّ وَطْئًا وَأَقْوَمُ قِيلًا)**

**((Nabiga) isduuduubayow * tuko habeenka wax yar mooyee * nuskiisa tuko ama ka nusqaami wax yar * ama ka badi, Quraanka si kala dhigdhigan u akhri * annagaa kugu soo dejinayno hadal culus * habeenka**

**saacadihiisa (oo la tukado) ayaa ku daran khushuuca aadna u toosan**), wuxuu leeyahay Alle:

**(فِي بُيُوتٍ أَذِنَ اللَّهُ أَنْ تُرْفَعَ وَيُذْكَرَ فِيهَا اسْمُهُ يُسَبِّحُ لَهُ فِيهَا بِالْغُدُوِّ وَالْآصَالِ * رِجَالٌ لَا تُلْهِيهِمْ تِجَارَةٌ وَلَا بَيْعٌ عَنْ ذِكْرِ اللَّهِ وَإِقَامِ الصَّلَاةِ وَإِيتَاءِ الزَّكَاةِ يَخَافُونَ يَوْمًا تَتَقَلَّبُ فِيهِ الْقُلُوبُ وَالْأَبْصَارُ)**

(**Guryo (Masaajidda) uu idmay Alle in la koryeelo laguna xuso dhexdooda magaciisa, waxaana ugu tasbiixsada dhexdooda aroor iyo galabba * rag ganacsi iyo beec aan ka mashquulinin xuska Alle, iyo oogidda salaadda iyo bixinta Zakada kana cabsanaya maalin dhexdeeda quluubta iyo aragguba ay gadgaddoomayaan**), Alle wuxuu leeyahay asoo tilmaamaya reer jannaadka:

**(كَانُوا قَلِيلًا مِنَ اللَّيْلِ مَا يَهْجَعُونَ* وَبِالْأَسْحَارِ هُمْ يَسْتَغْفِرُونَ)**

**(Waxayna ahaayeen kuwo wax yar habeenkii ka seexda * waagana dambidhaaf ayay wayddiisanayeen),** wuxuu leeyahay:

**: (تَتَجَافَى جُنُوبُهُمْ عَنِ الْمَضَاجِعِ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ خَوْفًا وَطَمَعًا وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ*فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَا أُخْفِيَ لَهُمْ مِنْ قُرَّةِ أَعْيُنٍ جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ).**

**(Dhinacyadooda ayaa ka dheeraada jiifka waxayna tuugayaan Allahooda iyagoo ka qaba cabsi iyo rajo wixii aan siinayna wax bay ka bixiyaan * ma oga naf waxa loo qariyay kuwaas oo indho ku qaboowsadaan abaal marin waxay camalfalayeen dartiis),** salaatulaylka waxay ka mid tahay arrimaha ay habboon

tahay inaan ku dadaalno gaar ahaan tobanka dambe ee bisha Ramadaan annagoo ku dayanayna nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu ahaa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – mid ugu dadaalo tobankan si ka daran maalmaha kale, waxaa laga wariyay Caa'isho -*Ilaahay raalli haka noqdee* - inay tiri:

**(كان رسول الله ( صلى الله عليه وسلم) إذا دخل العشرُ شدَّ مئزرَه ، وأحيَا ليله، وأيقظَ أهلَه)**

(**Rasuulka Alle - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – marka tobanka la gaaro hoosguntigiisa ayuu dhuuqsan jiray, habeenkana wuu soo jeedi jiray, reerkiisana wuu kicin jiray**), riwaayo kale waxaa ku sugan: (**wuxuu ahaa rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –mid ugu dadaalo tobanka dambe ee Ramadaan si ka daran maalmaha kale**).

Ramadaan ragga ayuu ku dhisaa celinta nafta iyo xasilloonida iyo soojeedka damiirka iyo toosnaanta dhaqanka, iyo maamulka hagaagsan, iyo koruqaadidda qiimaha akhlaaqda iyo banii'aadannimada iyo akhlaaqda wanaagsan oo toosinaysa dhaqanka aadanaha, oo ka dhigaysa midka ku toosan noloshiisa oo dhan, wuxuu ilaalinayaa xuquuqda wuxuu gudanayaa waajibaadka, wuxuu u degdegayaa inuu wanaag oo dhan u sameeyo naftiisa iyo bulshadiisa iyo dalkiisa iyo ummaddiisa, taasna waxay kusoo noqonaysaa xasilloonida bulshada iyo hormarkeeda, waxay faafinaysaa kalgacal iyo

naxatriis iyo wax kastoo kaalin ka qaadan kara hormarka dadweynaha.

Aan ku dadaalno inaan maalmahan kaga faa'idaysano digri iyo duco, iyo akhriska Qur'aanka, iyo inaan ku dadaalno fal kaste oo Alle – *cazza wajalla* – noo dhoweynaya, si aanan uga mid noqonin kuwa laga reebay naxariista Alle  maalmaha barakeysan, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

**(إِنَّ لِرَبِّكُمْ فِي أَيَّامِ دَهْرِكُمْ نَفَحَاتٍ ، فَتَعَرَّضُوا لَهَا ؛ لَعَلَّ أَحَدَكُمْ أَنْ يُصِيبَهُ مِنْهَا نَفْحَةٌ لَا يَشْقَى بَعْدَهَا أَبَدًا)**

**(Rabbigiina – *cazza wajalla* – wuxuu ku leeyahay maalmaha waqtigiina barakooyin ee u banbaxa, waxaa laga yaabaa midkiina inay soo gaarto barako oo kaddibna waligiisa uusan hoogi doonin**).

**Rabbiyow naga aqbal adigaa wax maqla oona og, nagana toobad aqbal adaa ah toobad aqbalbadane oo naxariis leh**